



## Maamulka arrimaha ilmaha iyo waxbarashada [Barn- och utbildningsförvaltningen]

### **BAAHIDA DUGSIGA XANNAANADDA AMA GOBAHA WAKHTILUMMISKA EE XILLIGA KULEELAHA 2019**

Xilliga kuleelaha waxaa dhaqdhaqaaqa dugsiya xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska loola qabsiin doonaa baahida waalidiinta. Dhawr kamid ah dugsiyada xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska ee Dowladda hoose maamusho way furan yihiin xilliga kuleelaha.

Haddaba sida loo qorsheeyo oona habka ugu wanaagsan loo isticmaalo fursadaha, ayaan waxaan doonaynaa in adiga oo ah qof waalid, na wargeliso baahida aad xilliga kuleelaha u qabi doonto dugsiyada xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska, waa inaad kahor 31 maarso aan ka helnaa wargelintaas.

Qofka adigoo kale ah oo ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka, waa inaad adigoo adeegsanayo Tempus ([www.tempushemma.se](http://www.tempushemma.se)) na wargeliso baahida aad xilliga kuleelaha u qabi doonto dugsiyada xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska, waa inaad kahor 31 maarso aan ka helnaa wargelintaas.

Hoos waxaa laga aqrisan karaa dugsiyada xannaanadda iyo goobaha wakhtilummiska ay arrinta khuseeyso.

#### **DUGSIGA XANNAANADDA ee furan xilliga kuleelaha, 8 luulyo ilaa 9 agoosto (toddobaadyada 28-32)**

Haddii ubadkaaga uu xilligaas u baahan yahay dugsiya xannaanadda, waa in maamulka dugsiya la wargeliya. Haddii aan maamulka la wargelin laguma tala geli doono in ubadkaaga uu xilligaas xannaanadda uu baahan yahay.

Haddii ubadkaaga uu dugsiya xannaanadda uu baahan yahay, waxaa lagu meelayn doonaa halka boos looga helo, oo ay ka shaqeeyaan shaqaalaha la garanaayo, oo ka shaqeeyo dugsiyada xannaanadda ee kala duwan.

**Haddii xilligaas aad uu baahan tihiin xannaanadda, waa inaad nagu wargelisaan [Tempus] kahor 31 maarso 2019. Taarikhdaas kaddib suurtagal ma noqon doonto. Haddii qorshaha wax iska beddelaan waa in agaasimaha dugsiya xannaanadda loola xiriira.**

Wixii su'aallo ah waxaa lagala xiriir karaa agaasimahada dugsiya xannaanadda.

#### **GOBAHA WAKHTILUMMISKA ee furan xilliga kuleelaha, 1 luulyo ilaa 2 agoosto (toddobaadyada 27-31)**

Haddii ubadkaaga uu xilligaas u baahan yahay goobaha wakhtilummiska, waa in maamulka la wargeliya. Haddii aan maamulka la wargelin laguma tala geli doono in ubadkaaga uu xilligaas goobaha wakhtilummiska uu baahan yahay.

Haddii ubadkaaga uu dugsiya goobaha wakhtilummiska uu baahan yahay, waxaa lagu meelayn doonaa halka boos looga helo.

**Haddii xilligaas aad uu baahan tihiin xannaanadda, waa inaad nagu wargelisaan [Tempus] kahor 31 maarso 2019. Taarikhdaas kaddib suurtagal ma noqon doonto. Haddii qorshaha wax iska beddelaan waa in agaasimaha dugsiya xannaanadda loola xiriira.**

Wixii su'aallo ah waxaa lagala xiriir karaa agaasimahada dugsiya xannaanadda.